

Magaalada Ottawa

Hagaha Beerashada Dhul-cawseedka Jidka Degaanka Ku Yaalla

Maajo 2025

Hordhac

Magaalada Ottawa waxaa ay u oggolaanaysa milkiilayaasha guryaha iyo kireystayaasha in ay beeran karaan oo ayna gacanta ku hayaan beer-guriyeed ku taalla dhul-cawseedka jidka ee ku dheggan ama ku qabsan guriga ay deggan yihiin. Hawshan ayaa la sameyn karaa rukhsad la'aan ama iyada oo aan lala xiriihin Magaalada, haseyeeshee, xeeridaamyada ku qoran [Sharciqa Isticmaalka iyo Daryeelka Waddooyinka](#) (Sharci Lr. 2003-498) ee lagu faahfaahiyay hagahan waa in la raacaa.



Beer-guriyeedyada ku yaalla dhul-cawseedka jidka, gaar ahaan kuwa ka baxaya dhirta asaliga ah, waxay leeyihiin faa'iidooyin, ay ka mid yihiin:


- Dhisidda wacyigelinta bulshada iyo taageeridda in dhir la beero
- Soo-jiidashada iyo taageeridda [faxal-gudbiyayaasha](#) iyada oo la kordhinayo kala duwanaanshaha noolaha
- Kordhinta iska-cabbinta abaarta iyo nabaad guurka carrada
- Yareynta saameynta meesha ka kulul meelaha u dhow
- Yareynta isticmaalka bacrimiye iyo sunta laysa cayayaanka
- Sii-wanaajinta xajinta biyaha duufaanka ee goobta
- Ilaalinta biyaha ottawa.ca/rightofway

- Dhiirrigelinta [u adkeysiga isbeddelka cimilada](#)
- Qiiqa ka soo baxa matoorada betrootka ku shaqeeya oo yar (cawska lagu jaro)
- Faa'iidooyinka caafimaadka jirka iyo dhimirka

Qaybta 1aad: Ka hor inta aadan bilaabin

1.1 Aqoonso dhul-cawseedka jidka ka-dibna daraasee ku habboonaanta

Inta uu le'eg yahay dhul-cawseedka jidka ee magaalada ayaa kala duwan. Meelaha qaarkood dhul-cawseedka jidka ayaa aad u ballaaran oo ku dhow dhanka guriga la deggan yahay. Meelaha qaarna, waxaa jiri kara waddo jidka dhinac marta oo ay dadku maraan, iyadoo dhul-cawseedka jidkana laga yaabo in uu waddadaasi ka maro hal dhinac ama labada dhinacba ilaa xariiqa guriga.



Barnaamijka [geoOttawa](#) ee magaalada ayaa kaa caawinaya go'aaminta qiyaasta goobta uu maro xariiqa gurigaaga iyo inta uu le'eg yahay dhul-cawseedka.

Dhul-cawseedka waa qayb ka mid ah dhulka magaalada ee danaha guud. Waxaa uu qabta shaqooyin badan, oo kuma koobna oo kaliya meel bannaan oo geedaha loogu talagalay, adeegyada dhulka hoostiisa mara iyo kuwa kor mara iyo kaabayaasha, iyo kaydinta barafka.

Dhul-cawseedka inta uu le'eg yahay waxaa dheer, in xaddiga iyo goobta kaabayaasha, maareynta biyaha duufaanka, tirada gaadiidka iyo dadka lugeynaya ee waddada adeegsada ayaa dhammaan ku kala duwan xaafadaha iyo xitaa waddooyinka. Waddadu waa good dadweyne oo

aad waxyar ku leedahay sida loo maamulo sida ay dadka iyo xayawaannada rabbaayadda ah ay ula tacaamulayaan beer-guriyeedkaaga. Heerka tayada iyo xakameynta wasakhowga qaar ayaa la lumiyaa marka aad beer ku abuurato dhul-cawseedka jidka. Booqo [bogga internetka Cunto Beerashada iyo Beer Falashada](#) ee Caafimaadka Guud ee Ottawa si aad u oggaato siyaabaha ay wasakhda raad ugu yeelato beeraha iyo dhirta.

Qofka kasta oo deggan waa in uu go'aamiyaa habboonaanta goobtooda, gaar ahaan haddii ay tixgelinayaan in ay cunto ku beertaan.

1.2 Ogow meesha ay maraan adeegyada sida biyaha, gaaska iyo korontada ka hor inta aadan dhulka qodin

Dhul-cawseedka waxaa kaliya la oggol yahay in gacanta lagu qodo. Goobaha ay maraan adeegyada biyaha, gaaska iyo korontada, iyada oo la raacayo Sharciga gobolka, waa in la helaa mar kasta oo aad wax qodeyso, habab kasta oo loo sameynayo, iyadoo lala xiriirayo [Ontario OneCall](#).

Qaybta 2aad: Qorshee beer-guriyeedkaaga



2.1 Go'aanso waxa la beeranayo

- Geed kuma abuuri kartid gudaha dhul-cawseedka ay Magaaladu-leedahay sida uu qabo [Sharciga Ilaalinta Geedaha](#) (Sharciga 2020-340). La xiriir barnaamijka [Trees in Trust](#) ee Magaalada haddii aad doonayso in Magaalada ay geed kuu beerto.
- **Ha beerin dhalato kastoo waxyeello leh ama sinjiga duullaanka ah.** [Lifaaqa B](#) waxaa ku jira liiska dhirta aan la oggolayn, ottawa.ca/rightofway

qaarkoodna waxaa weli lagu iibin karaa xarumaha lagu kobciyo dhirta yaryar iyo beer-guriyeedka.

- Mudnaanta koowaad sii [dhirta asaliga ahee](#) Bariga Ontario. Kooxaha fasha beer-guriyeedka Ottawa waa il heersare ah marka cilmi-baaris lagu sameynayo dhirta asaliga ah ee aan ku habboonayn dhul-cawseedka waddada.
- Eeg [Qaybta 4aad](#) si aad u fahamto halisaha kahor dhirta beerista.
- Tixgeli dhirta kala duwan ee si isku dhowaan la isugu abuuro si ay isku garabsato sida basasha, basal-cagaarta ama geedaha carafta xooggan leh ee cabsigeliya cayayaanka dabiiciga ah.
- Tixgeli dhirta cusbada u adkeysata haddii aad wax ku beerayso meel u dhow waddooyinka iyo jidadka ay dadku maraan.
- Cilmi-baaris ku samee inta uu la ekaan doonto joogga dhirta marka ay baaluqdo
 - Wax dhirta ah (oo ay ku jiraan kuwa gunta beerta ee sare loo qaaday ama jooga weelka) looma oggola in ay ka dheeraato joogga ugu badan ee 1.0 mitir ah.
 - Wax dhirta ah (oo ay ku jiraan kuwa gunta beerta ee sare loo qaaday ama jooga weelka) looma oggola in ay ka dheeraato joogga ugu badan ee 0.75 mitir gudaha geeska saddex xagalka ah ee in isgoyska laga arko loogu talagalay.
- Dhirtu ma abuuri karto khatarta xariiqaa-aragga ama ammaanka. Haddii aadan hubin joogga koritaanka dhirta aad dooratey, hubso in lagu beero meel u dhow xariiqaa guriga ee goobaha fudud in la gaaro halkaasi oo si habboon loogu joogteyn karo.
- Tixgeli sida aad beertaada u waraabin doonto. Ogow in dhirta cuntada soosaarto ay caadi ahaan u baahan tahay biyo badan iyo gacan ku hayn joogto ah. Laguuma oggola in aad ku xirto nidaam ama qalab waraabin dhul-cawseedka waddada iyo tuubooyin iyadoo ay khataro u keeni karaan

dadka adeegsada waddada ay dadku maraan. Haddii aad cunto beeranayso, dhirta waraabi adiga oo adeegsanaya biyo la cabbi karo. Dhirta kale, u isticmaal biyo la ogyahay in ay nadiif yihiin.

2.2 Cawska doogga ah ee beddelka ah

Milkiilayaasha guryaha ku dheggaan dhul-cawseedka waxaa ay dooran karaan in ay cawska ku beddelaan dhirta dhulka ku fidda oo ku habboon. Waxaa la sameyn karaa iyadoo abuur badan lagu beerayo ama loo oggolaanayo dhirta dhulka ku fidda in ay si dabiici ah u beddesho cawska, ama cawska ayaa gacanta lagu jari karaa ka-dibna booskiisa waxaa lagu beddeli karaa dhirta dhulka ku fidda.

Dhirta dhulka ku fidda ee ku habboon dhul-cawseedka waddada waa sinjiga dhirta hooseedka (oo macnaheedu yahay in ay jirid jilicsan leeyihiin) ee joogooda baaluuqanna uusan ka badnayn 20 sentimitir. Dhirta dhulka ku fidda ka mid ma ahan sinji kasta ee lagu qorey [Jadwalka "A"](#) ee *Sharciga Isticmaalka iyo Daryeelka Waddooyinka*, kuwaas oo ah sinjiga laga mamnuucay dhulka magaalada ee danaha guud.

Taxaddar muuji marka aad baareyso beddelka habboon. Tusaale ahaan, dhirta dhulka ku fidda ee caadi ahaan loo helo sida periwinkle ayaa ka noqon karta sinji duullaan ah gobolka Ontario mana ahan caws doog ah oo la oggol yahay in lagu beero dhul-cawseedka.

Dhirta dhulka ku fidda ma faragelin karto shaqada biyo mareennada, ma waxyeelleeyaan geedaha Magaalada ama ma xirayaan kaabayaasha sida dhuunta biyaha dab-damiska laga dhaamiyo iyo adeegyada kale sida biyaha, korontada iyo gaaska. Sida cawska doogga ah oo kale, haddii dhirta dhulka ku fidda ay aad u dheer tahay ama ay saameynayso hantidan maguurtada ah, milkiilaha guriga ama kireystaha ayaa ka mas'uul ah jaridda si loo gaabiyo.

2.3 Gunta dhulka beerta ee kor loo qaadey

- Gunta dhulka beerta ee kor loo qaadey waa sanduuq gidaar-toosan leh ama xuduud leh oo dhisme ahaan isku mid ah

ottawa.ca/rightofway

- Waxaa laga yaabaa in laga sameeyo alwaax ama agab kale oo ku habboon oo loogu talagalay in carrada lagu hayo ee dhirta sida birta la dheehay ama ka sameysan qaybo kala duwan. Waxaa lagu taliyay in la isticmaalo alwaax aan la daaweyn, gaar ahaan haddii cunto la beeranayo.
- Lagama sameyn karo shub, dhagax, jaajuur, ama malaas.
- La dhisayo ilaa joog ugu badnaan dhan 45 sm.
- Waa in ay raacaan shuruudaha goobta ee lagu muujiyay [Lifaaqa A](#).

2.4 Weel beerashada

- Weelka waa mid lagu kala-qaybiyo carro oo loo nakhshadeeyay ujeedooyin beerashada dhirta (tusaale ahaan, fuustooyinka iyo taayirrada ma ahan weelal ku habboon in lagu adeegsado beerta dhul-cawseedka jidka).
- Waa in uu noqdaa mid si sahal ah loo dhaqaajin karo (gurid xilliyeed ayaa loo baahan yahay).
- Waa in ay raacaan shuruudaha goobta ee lagu muujiyay [Lifaaqa A](#)

2.5 Qalabka taakuleeya dhirta

Aaladaha taakuleeya dhirta ayaa noqon kara qalab waxtar leh oo loogu talagalay koboco dhirta caafimaadqabka leh iyo in laga hortaggo dhirta in ay ku daadato goobo aan loo baahnayn. Waxyaabaha taakuleeya dhirta oo ku meelgaarka ah, sida tiirka digirta ama qafiska yaanyada, ayaa lagu oggol yahay beerta dhul-cawseedka haddii aysan ka weynayn 1.0 mitir joog ahaan iyo in uusan khatar ammaan ku hayn dadka lugeynaya ama xayawaannada. Biraha iyo alwaaxyada waaweyn ee la nakhshadeeyo lama oggola in laga dhiso beerta dhul-cawseedka waddada.

2.6 Fahan halka aan laga oggolayn beer-falashada

Kadib marka aad go'aamiso inta uu le'eg yahay dhul-cawseedka waddada ee gurigaaga ku

dheggan, ogow meelaha ay ku yaallaan geedaha Magaalada, dhulalka jeexan iyo dhammaan kaabayaasha laga dhisay heer dhulka la sima iyo kuwa kuwa dhulka korkiisa ah sida biyo shubka, qalabka laga xiro/xaddido qulqulka biyaha, biyaha dab-damiska, sanduuqyada adeegyada gaaska, korontada iyo biyaha iyo tiirarka korontada si loo go'aamiyo degaamada ka reebban ee looga baahan yahay ee hantidaasi maguurtada ah. Ka eeg [Lifaaqa A](#) liiska dhammeystiran ee beerta, gunta dhulka beerta ee kor loo qaadey iyo goobaha ka-reebban weelka.

Qaybta 3aad: Fahan mas'uuliyadahaaga

3.1 Gacan ku haynta beerta

- Waddooyinka ay dadka maraan iyo kuwa ay gaadiidka maraan waa in ay waqti kasta ahaadaan kuwo aan xannibaad lahayn oo aan waxba oolin ama bannaan.
- Si aad gacan uga geysato xaqiijinta beer-guriyeedyada in aysan abuurin arrimo bedqab sida hor-istaagidda xariiqa aragga waxaa jira xadidaadyo joog oo la nidaamiyay oo loogu talagalay beeraha dhul-cawseedka waddooyinka. Tixgeli aragga iyo xadidaadaha joogga dhirta marka aad go'aaminayso waxa aad ku beerayso beerta dhul-cawseedka waddooyinka.
- Gunta dhulka beerta ee kor loo qaadey iyo weelasha meel kale la geyn karo waa in ay noqdaan kuwo xaaladoodu hagaajisan tahay, oo aan lahayn wax ka soo taagan ama ku dheggan kuwaas oo u keeni kara khatar bedqab dadka lugeynaya, xayawaannada ama gaadiidka.

3.2 Hawlgallada jiilaalka



- Xilliga jiilaalka, dhul-cawseedka waddada ayaa door muhiim ah ka qaata kaydinta barafka. Ka-dib marka uu baraf badan uu da'do, barafka waxaa loo baahan karaa in waddada laga qaado, meelaha laga qaadayana waxaa ka mid ah jidadka meelaha la deggan yahay. Waxyeello in ay soo gaarto dhul-cawseedka waddada ayaa dhici karta oo sabab u ah [hawlgallada jiilaalka](#). Magaalada mas'uul kama ahan waxyeello kasta ee ku yimaada beerta dhul-cawseedka waddada.
- Inta jiilaalka lagu guda jiro, cusbo iyo agab kale oo wax lagu hoolo ama xogo ayaa lagu adeegsadaa jidadka ay dadku maraan iyo jidadka, kuwaas oo saameyn ku yeellan kara tayada carrada ee dhirta u dhow meelahan.
- Dhammaan weelasha meel kale la geyn karo waa in dhul-cawseedka waddada laga qaadaa marka ay taariikhdu tahay 15ka Nofembar ee sanad kasta. Waxaa lagu taliyay in aanan dib loogu celin dhul-cawseedka ilaa 15ka Abriil.
- Dhammaan waxyaabaha taakuleeya dhirta waa in dhul-cawseedka waddada laga qaadaa marka ay taariikhdu tahay 15ka Nofembar ee sanad kasta. Waxaa lagu taliyay in aanan dib loogu celin dhul-cawseedka ilaa 15ka Abriil.

3.3 Shuruudaha isticmaalka

Dhulka magaalada ee danaha guud, oo uu ka mid yahay dhul-cawseedka waddada, waa hanti ay Magaaladu leedahay oo ayna wadaagaan isticmaalayaal badan. Dhulka magaalada ee danaha guud waxaa ku waajiba dayactir joogto ah, mashaariicda dhismayaasha iyo adeegyada

dadweynaha ee aasaasiga ah, iyo sidoo kale waxqabadyada kale. Beeraha dhul-cawseedka waddada, oo ay ku jiraan gunta dhulka beeraha ee kor loo qaadey iyo weelasha meel kale la geyn karo, waa in aysan xannibin ama xayirin cid kasta ee loo idmay in ay shaqo ka qabato dhul-cawseedka waddada.

Haddii aad hesho ogeysiiska shaqada la qorsheeyay in laga qabanayo gudaha dhulka magaalada ee danaha guud ee saameyn kara beertaada, fadlan qorsheyso in aad qaado oo aad si ku-meelgaar ah dhirta meel kale u geyso ka hor inta aysan bilaaban shaqada la qabanayo. Isticmaal macluumaadka xiriirka ee la bixiyay si aad uga la hadasho shirkadda adeegga bixisa ama Magaalada ikhtiyaarka in dhul-cawseedka dib loogu soo celinayo carrada sare oo kaliya (oo aan caws lagu beeraynin) si aad dib dhirtaada ugu beerato ka-dib marka shaqada la dhammeeyo. Rujinta ama saaridda dhirta beerta iyo dib u beeridda waa in aad adiga naftaada sameysaa; shirkadaha adeegga ama Magaalada ma ilaalin doonaa, dayactiri doonnaan, ama sideeda dib ugu ma soo celin doonnaan beerta dhul-cawseedka degganaha.

Qaybta 4aad: Faham halisaha

4.1 Beer falashada ammaanka ah ee dhulka magaalada ee danaha guud

- Banee ama xannibaadda ka ilaali waddooyinka ay dadku maraan. Ha uga tagin tuubbooyinka ama qalabka beer falashada meelo ay ku abuuri karaan khatar kufid ama simbiirirax. Hubso in dhirtu aysan xannibin waddooyinka ay dadka maraan si looga hortago khatarta dhicidda iyo kufidda.
- Ka digtoonow hareerahaaga marka aad beeranayso meelaha waddooyinka u dhow. Beerta falo saacadaha uu iftiinka maalintii uu jiro, xiro dhar aad loo arki karo oo hubso carruurta iyo xayawaannada rabaayadda ah in si dhow loo kormeero haddii la beeranayo meel u dhow waddada ay gaadiidku maraan.
- Dhirta dherriga lagu beerto ayaa aad u cuslaan karta. Taxaddar muuji marka aad qaadayso ama meel kale geynayso weelasha ama qalabka beer-falashada.

ottawa.ca/rightofway

- Sunta cayayaanka ee kiimikada ah, sunta disha bahalka yar ee jiirka ku qaabka ah, sunta lagu dilo dhirta aan loo baahnayn iyo bacrimiyayaasha waxaa ay halis gelin karaan caafimaadka aadanaha iyo deegaanka. Tixgeli [beddelka dabiiciga ah ee xakameynta cayayaanka iyo dhalatada](#).
- Milkiilayaasha guryaha iyo kireystayaasha ee ka hela waraaq sannadle ah Magaalada Ottawa iyada oo ay sababtu tahay in gurigoodu uu leeyahay waxyaabo caafimaad ahaan walaac leh oo xumeeya carrada waa in ay raacaan taxaddarada si ay uga fogaadaan gaarista aan loo baahnayn.
- Talooyinka dheeraadka ah ee loogu talagalay yareynta halista dhaawaca inta lagu guda jiro beer-falashada ayaa laga heli karaa [bogga internetka Cunto Beerashada iyo Beer Falashada](#) ee Caafimaadka Guud ee Ottawa.

4.2 Tixgelinnada cunto beerashada



Halisaha la xiriira

Goobaha qaarkood waxaa laga yaabaa in aaney ku habboonayn in aad ku beerato cunto aad qorsheynayso in aad cunto. Marka la eego u dhowaanshaha waddo si guud loogu safro ama loogu lugeeyo, dadka iyo xayawaannadooda rabbaayadda ah ayaa laga yaabaa in ay la falgalaan beerta dhul-cawseedka ku taalla. La falgalkan waxaa uu keenayaa haliso, ay ka mid yihiin dadka in ay goostaan oo ay cunaan dalag aysan mas'uul ka ahayn beerashadiisa, beeraha in ay dhibaateeyaan dadka ka soo degaya gawaarida

meesha la dhigay ama xayawaannada rabbaayadda ah, wasakh kaadi iyo saxarro ah oo kaga imaan kara xayawaannada rabbaayadda ah iyo kuwa kale, iyo khilaafaadka deriska. Dalagga waxaa uu soo-jiidan karaa xayawaanno, ay ka mid yihiin xayawaannada ku qaabka ah jiirka, shimbiraha iyo cayayaanka kale ee beeraha ka qaraabta taas oo kordhin karta halista wasakhda saxarada ah iyo dhibaato-abuurayaal.

Magaalada ma damaannad-qaadi karto dhul-cawseedka in uu ku habboon yahay waxsoosaarka cuntada ah. Carrada waxaa mararka qaarkood wasakheyn kara wasakhda sida jeermiska, kiimikooyinka, ama biraha culus. Carrada waxaa hallayn kara isticmaalkii hore ee dhulka ama in ay soo gaarto wasakh cusub oo ka imaanaaya gawaarida waddada maraysa, cusbada loo adeegsado hawlagladda jiillaalka ama ilo kale. Carrada iyo dhirta ayaa waxaa sidoo kale wasakheyn kara wasakhda hawada ka dhalata, ama biyaha dib ugu soo firdhada marka uu roob da'o ama marka aad waraabineyso.

Sida halisaha loo khafiifiyo

Ka hor inta aadan go'aansan in aad beerto, ka qiimee goobta halka aad qorsheynayso in aad cunto ku beerato sifooyinka kasta ee goobta oo raad ku yeellan kara beerta.

Cuntada kaliya ku beero carrada la ogyahay in ay tahay mid nadiif ah oo aan wasakh lahayn.

- Haddii aad qorsheynayso in aad cunto si toos ah ugu beerato carrada jirta, waa in ciidaada la tijaabiyo. Carro tijaabinta/baarista ayaa la qabanqaabin karaa iyadoo la adeegsanayo shaybaaro baarista falanqeynta sameeya oo gaar loo leeyahay.
- Haddii aadan garanaynin tayada carrada oo aadanna qorsheysan in la tijaabiyo, waa in aad cunto beerashada ku xaddidaa gunta beerta ee sare loo qaaday iyo/ama weelasha laga buuxiyay isku-darka carro nadiif ah.

Gunta beerta ee sare loo qaaday ee laga dhisay alwaaxa waa in kaliya la dhisaa iyadoo la adeegsanayo alwaax aan la daaweeyn. Alwaaxa la daaweeyay iyo looxa ooliyada lagu

dhayay (t.a., kuwa loo adeegsado jidka tareenka) waxaa ku jiri wasakh u gudbi karta carrada iyo biyaha dhulka hoostiisa waxaanna qaadan kara dhirta. Waa in aad sidoo kale dhulka dhigtaa marada qurxinta muuqaal-dhuleedka ka hor inta aadan dhisin gunta beertaada ee sare loo qaaday. Maradan ayaa noqon karta wax kala xira oo ka joojinaya carrada nadiifka ah in ay ku darsanto carrada hoose oo ka hortagaya xididdada dhirta in ay gaaraan ciidda ka hooseysa gunta beerta ee sare loo qaaday.

Weelasha ayaa sidoo kale loo adeegsan karaa in cunto lagu beerto. Weelasha waa in laga dhigaa agabka ku habboon beer-falashada iyo cunto ku beerasho (haddii la adeegsan karo).

Haddii aad cunto beeranayso, dhirta waraabi adiga oo adeegsanaya biyo la cabbi karo. Dhirta kale, u isticmaal biyo nadiif ah. Biyaha roobka ee la dhaansado ee loo adeegsan doonno in lagu waraabiyo dhirta waa in lagu kaydiyaa weel nadiif ah oo waa in aysan wasakheyn agabka saqafka, saxarrada xoolaha, ama wasakh kale.



Tixgeli waxa aad beeranayso.

- Dooro dhirta soo saarta miraha khudaarta ah (t.a., yaanyo, bocor, digir) iyo miro maadaama ay wasakhda carrada oo ay gaarsiiyaan qaybaha la cuno marka loo eego geedaha caleentooda loo adeegto in cuntada lagu darsado, khudaarta caleenta leh ama khudaarta xididka ah.
- Khudaarta xididka ah sida karootada iyo barashada waa in aan lagu beerin carrada wasakheysan ama carrada aan tayadeeda la garanaynin. Ka fogaw in aad beerato geedaha ama khudaarta caleentooda la adeegsado maadaama qaybta la cuno ee dhirtan ay xiriir dhow la leedahay wasakhda carrada.

- Dhirta caleenteeda la adeegsado ayaa waxaa adag in laga biyo raaciyo busta iyo carrada marka loo barbardhigo dhirta kale sidaa daraadeed waa in laga taxaddaro marka la dhaqayo.
- Karinta dalagga waxaa ay yareynaysa halista cudurrada, kuwaas oo ah jeermisyo keeni kara caabuq, laakiin kama saari karto wasakhda kale, sida kiimikooyinka ama birta culus.

Ha cunin wax cunto ah oo ka baxay beer-guriyeedka haddii aad ku kalsoon tahay in ay ammaan tahay in la cuni karo mooyaane.

Si degdeg ah cuntada u gooso si aysan u soo jiidan cayayaannada iyo duur-joogta. Haddii aad ka walaacsan tahay in cuntada aad ku beeranayso beertaada in ay soo jiidan doonto jiir, eeg [bogga internetka Xakameynta Jiirka ee Caafimaadka Dadweynaha ee Ottawa](#).

Qaybta 5aad: Mas'uuliyadda iyo magdhowga

Waxaad kaliya ku abuuran kartaa beerta degaanka gudaha dhul-cawseedka sida tooska ah ugu dheggaan gurigaaga. Haddii aad doonayso in aad beer ku beerato guriga kale hortiisa, waa in aad ka heshaa oggolaansho qoraal ah milkiilaha guriga ku dheggaan. Milkiilaha guriga ku dheggaan ayaa ka mas'uul noqonaya dayactirka, wax-ka-beddelka, ama meesha ka saaridda haddii loo baahan yahay.

Iyada oo la raacayo *Sharciga Isticmaalka iyo Daryeelka Waddooyinka* (Sharci Lr. 2003-498), marka aad sameynsayso beerta dhul-cawseedka, waxaad oggolaanaysaa in aad Magaalada ka ilaaliso mas'uuliyad sharci iyo mid maaliyadeed kasta ee ka dhalan kara ficilkaaga, ama khasaarada iyo waxyeellooyinka Magaalada soo gaari karo, ku imaan kara ama ay mas'uul ka noqon karto ee sababta u ah beerta aad sameysay ama dayactirka beerta dhul-cawseedka waddada. Waxaad sidoo kale oggoshahay in aadan sheegan karin xaqka khasaaraha, kharashaadka, ama waxyeellooyinka ka dhashey ama ay sababeen Magaalada, shaqaalaheeda, wakiilladeeda ama qof kata oo magaalada ka socda, ama qof kasta ee loo idmay in uu dego ama ka shaqeeyo gudaha

ottawa.ca/rightofway

Waddo-weyn iyadoo ay sababtu tahay waxyeellaynta ama meesha ka saaridda beerta dhul-cawseedka.

Hubso in aad aqoon u leedahay qoddobada [Sharciga Isticmaalka iyo Daryeelka Waddooyinka](#) (Sharci Lr. 2003-498) ka hor inta aadan dhisin baartaada dhul-cawseedka waddada.

Qaybta 6aad: Walaacyada iyo fulinta

Haddii aad ka walaacsan tahay beerta dhul-cawseedka waddada, tixgeli in aad marka hore xalalka suuragalka ah kala hadasho qofka beerta beeranaya. Dadka degaanka ayaa intooda badan aad ugu faana oo daryeella beerahooda mana doonayaan in ay la murmaan deriskooda.

Haddii uu jiro walaac hawgal ama bedqab ama beerta ay sababeyso dhibaatooyin habka biyo saarista ah, la xirii 3-1-1. Magaaladu waxay xaq u leedahay in ay soo farageliso oo ay codsato wax-ka-beddelka ama meesha ka saarida beerta dhul-cawseedka waddada ee meesha la deggan yahay haddii ay jiraan arrimo taagan ama beertu aaney u hoggaansamin xeernidaamyada sharciga.

Qaybta 7aad: Kheyraadyada dheeraadka ah ee beer-falashada



Gobolka Ontario - [Sinjiga duullaanka ah ee la xaddiday ee Ontario](#) (sawirro leh)

Golaha Dhirta Duullaanka ah ee Ontario – [Hagaha Beddelkeeda Aniga I Beero "Grow Me Instead"](#) (Southern Ontario)

[Beer-falashada iyo Cunto Beerashada ee Caafimaadka Dadweynaha ee Ottawa](#)

[Kheyraadyada beer-falashada Just Food](#)

[Ottawa Horticultural Society gardening tips](#)


[Kheyraadyada beer-falashada Bahwadaagta
Wild Pollinator](#)





[Master Gardeners of Ottawa Carleton fact
sheets](#)

Lifaaqa A: Meelaha ka-reebban beer-falashada

Wax beerta dhul-cawseedka waddada ah, oo ay ku jiraan gunta beerta ee sare loo qaaday ama jooga weelka, looma oggola gudaha goobaha lagu muujiyay Shaxda 1aad. Kaliya cawska doogga leh ama dhirta dhulka ku fidda ee beddelka ah ee la oggol yahay ayaa loo oggol yahay goobahan.

Shaxda 1: Goobaha ka reebban waxa dhul-cawseedka waddada

Waxaha	Laguma oggola gudaha	Sawir
Jeex loo dillaaciyay in ay biyuhu maraan	Hoobad hore ama gadaale ama gudaha jeexa	
Biyo shub ama godka kor ka daboolma ee jidadka u yaalla	1.5 mitir	
Geedka dowladda hoose	1.0 mitir laga cabbiro laga bilaabo jirrida	

Waxaha	Laguma oggola gudaha	Sawir
Dhuun hareeraha waddooyinka ku taalla oo looga biyo dhaamiyo dab-damiska	Gacanta dhuunta hareeraha waddooyinka ku taalla ee looga biyo dhaamiyo dab-damiska oo 1.5 mitir ah iyo sidoo kale gudaha marin 3.0 mitir ah min dhuunta ilaa waddada ay baabuurta maraan	
Sanduuqa qalabka yareeya ama kordhiya quwadda korontada	1.5 mitir ee xagga dambe ama dhinacyada iyo 3.0 mitir min xagga hore ah	
Kaabayaasha dhulka la siman iyo kuwa dhulka korkiisa ah sida salka gaaska iyo fadhiyada tiirarka isgaarsiinta, calaamdaha Magaalada iyo sanduuqyada boostada Canada Post	1.0 mitir	
Boosteejooyinka baska OC Transpo	25 mitir ee calaamadda boosteejada baska ee jihada uu baska ka yimaado ama 5 mitir laga bilaabo geeska dhulka laamiga ah ee ay dadku istaagaan, mid kastoo ka fog calanka boosteejooyinka baska; iyo 5 mitir dhanka ay jirto caalamadda boosteejada baska ee ah jihada uu u baxayo; iyo aagga cabbirkiisu yahay 20 mitir dherer ahaan iyo 3 mitir dhererka ballaca ah ee dhinaca dambe ee boosteejada baska, laga soo cabbiray dhanka calaamadda boosteejada baska ee jirta dhinaca laga soo galo boosteejada	

Gunta beerta ee sare loo qaaday waa in dib looga sikiyaa waddada ay dadka maraan iyo tan ay baabuurta maraan sida lagu muujiyay Shaxda 2aad.



Shaxda 2: Gunta beerta ee sare loo qaaday ayaa dib looga sikiyaa waddada ay dadku maraan iyo tan ay baabuurta maraan

Nooca dhul-cawseedka waddada	Laguma oggola gudaha	Sawir
Leh waddo ay dadku maraan	- dhul-cawseedka u dhaxeeya waddada ay dadka maraan iyo tan ay baabuurta maraan 0.6 mitir u jirta waddada ay dadku maraan ee dhul-cawseedka u dhaxeeya waddada ay dadku maraan iyo xariiqa guriga	
Aan lahayn waddada ay dadka maraan	1.5 mitir u jirta waddada ay baabuurta maraan	

Weelasha la qaadi karo uma baahna in la sikiyo waddada ay dadku maraan; haseyeeshee, wax uma gudbi karaan waddada ay dadku maraan ama ma xannibi karaan adeegsadayaaasha waddada ay dadku maraan. Weelasha la qaadi karo waa in dib looga sikiyaa waddada ay baabuurta maraan sida lagu muujiyay Shaxda 3aad.

Shaxda 3: Weelka la qaadi karo ayaa laga sikiyaa waddada ay baabuurta marto

Goobta dhul-cawseedka waddada	Laguma oggola gudaha	Sawir
Waddada lagu qeexay in ay tahay waddo maxalli ah ama mid waddooyinka maxalliga ah ku xirta waddada weyn oo xadka xawaaraheedu uu yahay 40 km/saacadii ama ka yar	0.5 mitir u jirta waddada ay baabuurta maraan	

Goobta dhul-cawseedka waddada	Laguma oggola gudaha	Sawir
Waddo loo soocay in ay tahay waddo isku xirta waddada weyn iyo waddooyinka kale ama waddo loo soocay in ay tahay waddo maxalli ah ama waddada isku xirta waddada weyn iyo waddooyinka yaryar halkaasi oo xadka xawaaraha uu ka badan yahay 40 km/saac	1.5 mitir u jirta waddada ay baabuurta maraan marka uusan jirin waddo ay dadku maraan	
Waddo loo soocay in ay tahay waddo isku xirta waddada weyn iyo waddooyinka kale ama waddo loo soocay in ay tahay waddo maxalli ah ama waddada isku xirta waddada weyn iyo waddooyinka yaryar halkaasi oo xadka xawaaraha uu ka badan yahay 40 km/saac	Dhul-cawseedka waddada ee u dhaxeeya waddada ay dadka maraan iyo tan ay baabuurta maraan	

Lifaaqa B:

Dhirta aan loo oggolayn dhul-cawseedka waddada

[Jadwalka A](#) ee *Sharciga Isticmaalka iyo Daryeelka Waddooyinka* ayaa dhigaya liiska dhalatooyinka waxyeellada leh iyo dhirta duullaanka ah ee aan la oggolayn in lagu beero dhulka magaalada ee danaha guud. Kuwani waxaa ka mid ah dhir badan oo laga yaabo in weli lagu iibiyo xarumaha lagu kobciyo dhirta yaryar iyo beer-guriyeedka.

Dhirtan soo socota waa la mamnuucay. Jadwalka sharciga ka eeg liiskii ugu dambeeyay.

Dhirta dhulka ku fidda ee duullaanka ah:

- Creeping Jenny
- English Ivy
- Goutweed
- Lily of the Valley
- Periwinkle
- Spearmint
- Spurge (Cypress, Japanese, Leafy)
- Yellow Archangel

Cawska iyo geedaha gaagaaban ee duullaanka ah:

- Barberry (Common, Japanese)
- Buckthorn (European Glossy)
- Honeysuckle (Japanese, Ornamental)
- Jointed Goatgrass
- Miscanthus grass
- Multiflora roses
- Serrated Tussock
- Winged Burning Bush
- Wintercreeper
- Woolly Cupgrass

Dhalatooyinka iyo dhirta kale ee duullaanka ah:

- Coltsfoot
- Common Crupina
- Dame's Rocket
- Daylily aka Ditch Lily
- Dodder
- Dog-strangling Vine
- Garlic Mustard
- Giant Hogweed
- Knotweeds (Bohemian, Giant, Himalayan, Japanese)
- Knapweed
- Kudzu aka Japanese Arrowroot or Chinese Arrowroot
- Oriental Bittersweet
- Invasive Phragmites
- Poison-hemlock
- Poison-ivy
- Ragweed
- Smooth Bedstraw
- Thistles (Canada, Bull, Sow)
- Tansy Ragwort
- Wild Chervil
- Wild Parsnip